

: D [D D F X V X E F R U R Q D
& 2 5 2 1 \$

Balkoonka wax ma ku dubanaysaa?

Ma jiro sharci kuu dii daaya inaad balkoonka wax ku dubato. Laakiin kuwa badan oo ka mid ah shirkadaha guryaha leh iyo ururada ijaareyda, ayaa leh sharciyo la raaco. Wax dubashada nooca dhuxusha laguma isticmaali karo balkoonka. Dab badan baan jecleyn qiiqa dhuxusha ee kasoo baxa dabkeeda. Isticmaal tan korontada ama gaaska loo isticmaalo. Marna haka tegin dabkoo shidan.

Dababka waaweyn ee ka dhacay Iswiidhan

Gobolkaan Kalmar wuxuu leeyahay keymo badan. Haddii dab kaco si dhakhsa ah buu u fidiyaa.

2018-kii keymo badan baa gubatay. Isla sanadkaa meelo badan oo waddanka ah baa dab ka kacay. Dad badan baa guryahoodii laga raray.

2014-kii waxaa dab weyn uu ka kacay gobolka Västmanland. Geedo milyuunaad karoon ah baa gubtay. Kumanaan dad ah baa si ikhtiyaari ah ugu gurmaday. Gobolka Kalmar shaqaalaha dab damiska iyo gawaaridooda ayaa caawimaad ugu tagay. Kumanaan dad ahna si ikhtiyaari ah bay u caawiyeen.

Ma "guri fasaxaysanaysaa"?

Weli ma maqashay ereyga "guri fasaxaysi" waa laba erey oo la isku daray "Guri" iyo fasax. Waa eray hada la sameeyey, oo macnihiisu yahay inaad guriga joogto meeshaad ka dhoofi lahayd. Markaa sanadkan dad badan qaadanaya "guri fasaxaysi".

/DEDGLL ZLLJED PDUEDDQ ZDUTDGGDQ ZD|
Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.



VÄSTERVIKS
KOMMUN



U IDFBVVDFDQD
IDFBVWHMNR